



Bayaanka Guddoomiyaha Waxbarashada Guadalupe Guerrero

Maarso 19, 2021

Wali qalbigeygu wuxuu aad uga xun yahay falalka rabashadaha iyo naceybka wata ee lagula kacay bulshooyinka asalkoodu ka soo jeedaa Eeshiyaanka iyo Jasiiradaha Pacific ee ku nool Gobolka Georgia, haddii ay yihiin kuwa magaaladeena ku nool ama dalka guud ahaanba. Waxaan aad uga xumaaday qalbi-jabna igu keentay guuldarada ku dhacday inaan la aqoonsan bani'aadamnimada aynu wadaagno. Dhammaan qoysaska ay dhibaataadani ay masiibadani xun ka soo gaartay qalbiyadeena ayey meel gaar ah ayey ku leeyihiin oo aan ku xasuusano. Haddii aan ahay guddoomiyaha waxbarashada ugu weyn iskuulada Oregon waxaan jecelahay inuu qof kastaa ogaado inaan taageero la garab joogno xubnaha bulshooyinkeena Eeshiyanka ah iyo kuwa Jasiiradaha Pacific ah. Degmadeena iyo nolosheena waxaa hodan ka dhiga sidoo kalena xoojiya joogitaan iyo waxyaabaha ay ku soo kordhiyeen bulshooyinka Eeshiyaanka ah iyo kuwa Jasiiradaha Pacific asalkoodu ka soo jeedo.

Waxaanu taageero la garab joognaa kuwa maalin walba ka shaqeeya sidii loo joojin lahaa rabashada gacan ka hadalka ee loo geysanayo bulshooyinka Eeshiyaanka iyo kuwa Jasiiradaha Pacific ah. Waxaa iga go'an ineynaan ku ekaan kaliya cambaareyn ee aan si wada jir u mideyno awoodeena sidii aan u sheegi lahayn iyada oo aan la dagaalameyno hadalada naceybka iyo rabashadaha wata ee degmadeena.

Xaggan hoose waxaa ka heli kartaan liisto agabyada aad heli karto sidii aan uga wada shaqeyn lahayn inay abuurno xaalado arday kasta oo ka mid ah ardayda PPS, gaar ahaan ardayda cadaalada ka fog, inay dareemaan dareen ah inay ka mid yihiin, ku xiran yihiin da' waaweyn oo daneynaya, iyo inay helaan gargaarkii ay u baahnaayeen sidaas darteed waxa ay diyaar u noqon doonaa inay hoggaamiyaan duni cadaalada bulsheed leh.

Guadalupe Guerrero
Guddoomiyaha Waxbarashada

Agabyada:

Jamie Suehiro, AVID TOSA, Kulliyada & Waaxda U Diyaar noqoshada Xirfada iyo Ururka La Taliyaasha Ardayda Dugsiga Sarre ee Ida B. Well-Barnett Eeshiyaanka iyo Jasiiradaha Pacific, Waxaa loo diyaariyey oo isku dubariday macallimiinta:

[Agabka Ka Hortaga Eeshiyaan Naceybka](#)

Ururka Eeshiyaanka Pacific Gobolka Oregon, Hay'ada Aasaaska Bulshada, Midnimada Eeshiyaanka iyo Sidii ay cadaalad bulsheed u heli lahaayaan Jasiiradaha Pacific. Waxa aynu si

wada jir ah xoogeenaa ugu horumarinayaa sinaanta, abaabulka iyo in loo dodo bulshooyinkeena xuquuqdooda.

[APANO Responds](#)

[APANO Condemns Anti-Asian Hate and Bias](#)

Xusuusin haddii adiga, ardayda, waalidiinta ama bulshadu ay kala kulmaan hadalada naceybka wata iskuulka bulshadeena, waxaan u diyaarinay hab loo maro hadalad waana dadkaasi la kulmay raacaan habkan soo socda:

[PPS Hate Speech Protocols](#)